PATIENT EDUCATION


# Tuubada Caloosha la geliyo ee Bukaanka lagu Quudiyo (PEG)

## Waa maxay tuubada PEG?

PEG waa nooc kamid ah tuubada quudinta ee la geliyo caloosha. Tuubada noocaan ah wazxa loo isticmaali karaa:

- Quudinta badqabka iyo wax ku oolka ah ama quudinta nafaqada.
- In lagu quuto cabitaanada.
- In lagu qaato daawooyin.
- Nidaamka hawada saarista (ka saarista hawada caloosha).

## Sidee tuubada PEG u muuqataa?




## Maxay tahay sababta aan ugu baahanahay tuubada quudinta?

- Nafaqada muddada dheer ee uu amro dhakhtarkaaga.
- Waxaa loogu talagalay dadka dhibaatooyinka ku qaba wax laqista.
- Waxaa loogu dadka ay tuubo sanka oga jirto ee u baahan in laga bixiyo.

## Maxaa dhacaya kahor gelinta tuubada PEG?

- Waxaad la kulmi doonaa dhakhtar, khabiirka nafaqada, iyo sida suurtagalka ah isku duwaha daryeelka guriga. Waxay dib u eegi doonaan taariikhdaada, waxayna sharaxi doonaan sida tuubadu u shaqeyso, waxayna ka jawaabi doonaan su'aalo kasta ood qabi karto.

## Sidee iskugu diyaariyaa tuubada PEG?

- Xaqiiji inaad u sheegto dhakhtarkaaga haddii aad qabto wax cilado dhiig bax ah.
- Waxaa lagaa codsan doonaa inaadan cunin ama cabin wax kadib saqda dhexe habeenkii kahor marka lagu gelinaayo tuubada.
- Waxaa laga yaabaa in lagaa doonayo in aad si kumeel gaar ah u joojiso qaar kamidka ah daawooyinka kahor inta aan lagu gelin PEG.
    - **Dhiig Khafiifiyayaasha**
        - sida Coumadin (warfarin), Ticlid (ticlopidine hydrochloride), Agrylin (anagrelide), Xarelto (Rivaroxaban), Pradaxa (Dabigatran), Pletal (Cilostazol), Brillinta (Ticagrelor), Eliquis (Apixaban), Effient (Prasugrel), Plavix (Clopidogrel), iyo Aspirin. Waa inaad la hadasho dhakhtarka kuu qoray ama takhasusle ugu yaraan 2 asbuuc kahor ballanta laguugu gelinaayo tuubada PEG. Ha joojin qaadashada daawada adiga oo aan ogolaasho ka helin dhakhtarkaaga.
    - **Daawada Insuliinta iyo Macaanka (Sokoroowga)**
        - Fadlan la xiriir dhakhtarkaaga la socda heerka guluukoos. Daawooyinkaaga waxay u baahan karaan in wax laga badelo sababo la xariira xadidaada looga baahan yahay gelinta tuubada PEG. Ha joojin qaadashada daawada adiga oo aan ogolaasho ka helin dhakhtarkaaga.
- Xaqiiji in dhakhtarkaagu oggaado haddii aad uur leedahay.
- Diyaarso darawal iyo qof kula jooga maalintii. Laguuma ogolaan doono inaad gaari kaxeyso haddii aad qaadato daawada suuxdinta.
- Xaqiiji inaad raacdp tilmaamaha la xiriira cuntada aad cuneyso oo dhakhtarku ku siiyey.

## Maxay tahay inaan fisho kahor inta aan la i gelin tuubada PEG?

- Waxaa la sameyn doonaa sheybaar kahor inta aan lagu gelin tuubada PEG waxaana eegi doona dhakhtarkaaga.
- Dhakhtarkaagu sidoo kale wuxuu eegi doonaa khataraha iyo faa'idooyinka kuugu jira.
- Waxaad saxeexi doonaa foom oggolaansho kahor inta aan lagu gelin tuubada quudinta.
- Tuubada daawada xididka IV laga qaato  yar ayaa lagaaga xiri doonaa xididka si laguu siiyo daawada suuxinta  inta lagu jiro baaritaanka.
- Waa la bixin doonaa qalabyada iyo ookiyaalayaasha kahor qaliinka. Waxaa lagu waydiin doonaa inaad xirato dharka isbitaalka.

## Waa maxay waxyeelada ka dhalan karta ee suurtagalka ah?

- Waxyeelada caafimaada ee aan wanaagsaneyn ee laga dhaxlo daawada suuxdinta.
- Jeexdinta ku timaadda darbiga dhuunta, caloosha, ama mindhicirada yaryar.
- Cilada Peritonitis.
- Dhiig bax.
- Caabuq ku dhasha goobta qaliinka lagu sameeyay.
- Haddii aad qabto wax su'aalo ah, fadlan waydii dhakhtarkaaga.

## Maxaan filan karaa inta lagu jiro gelinta tuubada PEG?

- Waxaa lagu siin doonaa cirbada qalajiyaha ee laga qaato xididka kahor inta aan lagugu xirin tuubada PEG.
- Waxaad u seexan doontaa dhabarka inta qaliinka lagu jiro.
- Shaqaaluhu waxay si taxadar leh u nadiifin doonaan maqaarka caloosha.
- Waxaa laga yaabaa in la xiro gacmahaaga si lagaaga ilaaliyo inaad taabato aagga tuubada ku xiran tahay.
- Waxaa caloosha lagaaga duri doonaa daawada suuxdinta iyo daawada suuxitaanka.
- Waxaa meel yar laga daloolin doonaa darbiga caloosha oo ah meesha tuubada PEG ka bixi doonto.
- Qaliinku wuxuu qaadan doonaa 30 ilaa 45 daqiiqo.
- Waxaa lala socon doonaa heerarka cadaadiska dhiigaaga, wadno garaacaaga, neefsashada iyo ogsijiinta inta qaliinka socdo.

## Maxaan filan karaa kadib gelinta tuubada PEG?

- Waxaa lala socon doonaa heerarka cadaadiska dhiigaaga, wadno garaacaaga, neefta, iyo ogsijiinta inta aad joogto goobta soo kabashada.
- Qoyskaaga iyo saaxiibadaa ayaa kula joogi kara kadib baaritaanka.
- Boomaataada qalajiye ah ee dareeraha ah ayaa la geliyaa goobta tuubada quudinta.  Goobta waxaa lagu dabooli karaa faashad.
- Haddii aad qaadato Coumadin, Plavix, ama daawo kale oo dhiiga khafiifisa, waydii dhakhtarkaaga goorta aad dib u bilaabi karto.
- Waxaa lagu bari doonaa sida loogu rogo bambarka banaanka (fiiri sawirka) sideedii saacadoodba mar 24 ta saacadood ee ugu horeysa.
- Dhakhtarkaaga ayaa kuu sheegi doona waqtiga marka tuubada la isticmaali karo markii ugu horaysay.
- Waxaa lagu siin doonaa tilmaamo ku saabsan sida loo daryeelo goobta lagaa qalay.
- Kalkaalisada ayaa ku siin doonta tilmaamaha isbitaal ka bixista oo qoraal ah kahor inta aadan bixin.
- Waad wici kartaa xafiiska dhakhtarka haddii aad qabto wax su'aalo ama walaacyo ah.

## Tixgelino Gaar ah

- Daryeel bixiyaashu waa inay yaqaanaan in la waco dhakharka **isla markiiba** haddii tuubadu soo baxdo inta lagu jiro labada asbuuc ee koowaad ilaa lix todobaad kadib marka lagu geliyo tuubada. Haddii arrintaan dhacdo, bukaanku wuxuu u baahan doonaa in dib loogu qabto ballan si PEG loogu soo celiyo iskaan ama qaliin.
- Kadib muddo lix asbuuc ah, hoolku (hoolka ay tuubadu ku jirto) waa mid adag. Haddii tuubadu soo baxdo kadib lix asbuuc, waxaa tuubada la gelin karaa meesha ayadoon la isticmaalin iskaan.

**Tixraacyada**


Tuubada caloosha la geliyo ee quudinta (Percutaneous Endoscopic Gastrostomy, PEG) - Cleveland Clinic waxay fahansan tahay Tuubada caloosha la geliyo
(PEG) – Ururka Mareykanka ee Tuubada Caloosha la geliyo (American Society of Gastrointestinal Endoscopy, ASGE)